

Carruur Caafimaad



Ciladaha

Dhallinta Oregon ayaa u baahan taageero iyo dhiiri gelin si ay ugu koraan uguna qaan gaaraan qaabab nolol caafimaad leh. Marka lagu daro guryo badqab, taageero leh, waxay u baahan dugsiiyo siinaaya agab ku habboon, hagd iyo fursado ay ku helayaan nolol caafimaad leh. Dhallintu waxay u baahan yihiin macalimiin, barbaariyaal iyo bulsho leh dad waawayn oo taageeraaya kuwaasoo tusaale u ah asalkooda dhaqanka.

Dhammaan gobalka Oregon, ardayda Madoowga ah ayay u badan tahay in labo jibaar loo edbiyo sababo dabeecad xumo awgood waxayna u badan tahay in labo jibaar in ka badan dadka kale laga cayriyo ama laga ganaaxo dugsiga. Habdhaqannada khatarta ah waa in la badalaa laguna badalaa kuwo fiican. Cadaalada dhaqan celinta iyo dhex-dhexaadinta, halkii la raaci lahaa hanaanada edbinta ee caadada ahaa, ayaa kor u qaadi karta natiijooyinka dhalin yarada korna u qaadi karta tirada qalin jebisa.

Xalalka

Istaraatiijiyado xal loogu helaayo eexda ka jirta dugsiga iyo kor loo qaado faya qabka jireed iyo kan maskaxeed ee ilmaha ayna ku jiraan:

- In lasoo afjaro cadaalad darada ka jirta dugsiga ee haysata carruurta dadka Madoowga ah, Dhaladka ah, dadka aan ahayn caddaanka iyo Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska (BIPOC-AI/AN) ciyo dhalin yarada

ayadoo la adeegsanaayo tababarka macalinka, dabagalka xogta iyo hubinta macalimiinta, maamuleyaasha iyo dugsiyada

- In la xaqiijiyo lana taageero dhammaan degmooyinka dugsiga si ay u dhaqan-gashaan waxbarashada caafimaadka balaaran ee fasallada K-12

Waxbarashada iyo bii'ooyinka wanaagsan ee dugsiga ayaa tiirar muhiim u ah hormarinta kobaca caafimaadka dhallaanka. Healthier Together Oregon (HTO) waxay doonaysaa inay bixiso adeegyada caafimaadka dhimirka oo ku habboon dhaqanka iyo luuqada, baxnaaninaaya dhibaatooyinka maskaxda, oo leh qaybo badan iyo taageerooyin dhammaan carruurta iyo qoysaska.

HTO waxay u taagan tahay kordhinta adeegsiga cadaalada dhex-dhexaadinta iyo dhaqan celinta ku salaysan ee lagu sameeyo dugsiyada. Waxay muhiim u tahay xal u helida isir nacaybka nidaamka iyo baabi'inta cadaalad darada la xariirta dugsiga ee lagula kaco carruurta iyo dhalinta kasoo jeeda bulshooyinka BIPOC-AI/AN.

Si kobcin dheeraad ah loogu sameeyo caafimaadka iyo faya qabka carruurta Oregon, HTO ayaa doonaysa qaabab ay ku balaarinayso ayna ku kordhinayso helitaanka baaritaannada caafimaadka kahortaga ah iyo caafimaadka afka ee dugsiyada.



HTO: Qorshaha Dhisida Oregon intaan Ka fiican

Healthier Together Oregon (HTO) waa farsamo awood badan oo lagu hormarinaayo sinaanta dhammaan dadka Oregon. Ayadoo COVID-19 uu wax badan kala cadeeyay, maaha in qof kasta helay fursad iskumid ah oo uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Dadka aan cadaanka ahayn, dadka danyarta ah, dadka ktirsan bulshada LGBTQ+ (qaniisiinta), dadka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha, dadka naafada ah iyo dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee gobalka ayaa waajahaaya caqabado badan sabab la xariirta cadaalad daro ka jirta qaab dhismeedka bulsho iyo midka dhisme taasoo saamayn ku leh caafimaadka.

Sababa la xariirta in caafimaadka iyo fayaqabku ku tiirsan yihiin arimo kaladuwan, HTO ayaa dejisay taxaneyaalka badan oo xeelado ah kuwaasoo, marka la xaliyo si guudna loo dhaqan gasho, hormarin muuqat ku samayn kara noloshu qof kasta oo gobalkaan dagan.

HTO waxay doonaysaa inay dejiso Qorsheyaasha Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo sidoo kale muhiimadaha wakaaladaha iyo ururada, barnaamijyada iyo maalgashiyada. Waxay doonaysaa iskaashato kaladuwan oo ka shaqeeya

laamaha kaladuwan oo wadaagaaya dedaal lagu dhaqan gelinaayo yoolalkaan waawayn. Waaxahaan waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, saraakiisha la doortay, loo shaqeeyaasha, tabarucaada, gaadiidka, isticmaalka dhulka iyo qorshaynta, caafimaadka gobalka, qabiilka iyo kan dadwaynaha ee maxaliga ah, cadaalada danbiyada iyo fulinta sharciga, ururada bulshada, ururada ku salaysan diinta, adeeg bixiyaasha guriyaynta iyo aadanaha iyo waxbarashada.



Nala samee Iskaashi

HTO waxay doonaysaa inay xariir la samayso qolyaha kale ee u taagan inay hormariyaan sinaanta ka jirta Oregon. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama nagalaso xariir:



WEBSSETKA

healthiertogetheroregon.org



IIMEELKA

publichealth.policy@state.or.us



NOQO ISKAASHADE

healthiertogetheroregon.org/potential-partner



YOUTUBE

bit.ly/3jvkuAE



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso
Oregon Health Authority
(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)